

LA BARN LEVE I FRED



22. OKTOBER 2023



Redd Barna

TV-AKSJONEN NRK

Til elever og foresatte!

TV-aksjonen NRK 2023:

Ka qayb qaada TV-aksjonen NRK!

Carruurta iyo dadka waawayn waxaa lagu martiqaadayaa inay ka qayb galaan TV-aksjonen NRK. TV-aksjonen NRK waa xaflad lacag ururin sanadle ah oo la qabto tan iyo sanadkii 1974. Sanad kasta, Norway waxay lacag u ururisaa sababo muhiim ah dad badani ayaana ka qeyb qaata, laga bilaabo qoyska boqortooyada ilaa iskuullada iyo ganacsiyada. Oktoobar kasta, 100,000 oo carruur iyo dad waawayn ah ayaa Axadda u istaaga inay garaacaa albaabbada xaafadooda iyagoo uruurinaaya qaaraan – waa uruuriyaasha lacago qaaraan ah. Dad kale waxay iibiyaan doolsheyaal ama waxay diyaariyaan riwaayado qaaraan uruurin ah.

Sannadkan, qaaraan uruuriyaashu waxay albaab walba tagi doonaan 22 Oktoobar.

Lacagta lasoo uruursho waxaa lagu taageerayaa shaqada Save the Children ee carruurta ay saameeyeen dagaalka iyo rabshadaha. Hal kamid ah lixdii ilmood ee aduunyada ku nool ayaa ku dhex kora dagaal iyo qalalaase hadda ayayna ugu badan yihiin dadka barakacayaasha ah. Si wadajir ah ayaan dooneynaa inaan u caawino 100,000 carruur ah si ay u ciyaaraan, wax u bartaan ayna nabad ugu noolaadaan. Lacagtan lasoo aruuriyay ayaa ka dhigaysa qoysaska, iskuullada iyo bulshooyinka kuwo caruurta badqab u leh. Lacagtaan waxaa lagu taageeri doonaa mashaariic ka jirta Yukrayn, Suuriya, Bangladesh, Koonfurta Suudaan, Jamhuuriyada Dimuqradiga ah ee Kongo, iyo Norway. Wadanka Norway waxaan caawin doonaa carruurta kasoo qaxay dagaalka iyo colaada.

Carruurta ayaa wax ka baran kara mawduuca sanadkaan ee lagu dhigaayo dugsiga oo uu bixinaayo barnaamijka waxbarashada ee TV-aksjonen, kaasoo si bilaash ah looga helaayo barta tvaksjonen.no iyo salaby.no.

Booqo tvaksjonen.no si aad u akhrido xog ku saabsan sida adiga iyo qoyskaagu uga qaybgeli kartaan TV-aksjonen NRK.

TV-AKSJONEN NRK

LA BARN LEVE I FRED • tvaksjonen.no • post@tvaksjonen.no • Innsamlingskonto: 8380.08.09005